

Dib Ugu Soo Dhawoow Macluumaadka iyo Ilaha/Kheyraadka
30-ka Diseembar, 2021
UGU DAMBEYN

Mawduuc/Ujeedada:

Dib Ugu Soo Dhawoow - Macluumaad Muhiim u ah Qoysaska iyo Shaqaalaha CCS

Qoysaska iyo Shaqaalaha CCS ee qaaliga ahoow,

Waxaan rajeynayaa inaad heshay nasasho, caafimaad qab, iyo Nasashada Fasaxa Qaboobaha oo bad-qa leh. Waxaan rajeynayaa ardaydeena, macalimiinteena, iyo shaqaalaheena inay soo laabanayaan Isniinta, 3-da Janaayo.

Waxaan qorsheyneynaa inaan si buuxda ugu soo laabano waxbarashada qof ahaaneed, laakiin inta aan isu diyaarineyno Sanadka Cusub, waxaan si dhow ula soconaa kala duwanaanshaha caabuqa omicron iyo sida ay u saameyneyso xogta CAABUQA COVID ee bulshadeena. Waxaan xiriir dhow la leenahay Caafimaadka Dadweynaha Columbus, oo uu weheliyo la-taliyaheena caafimaadka degmada, Dr. Sara Bode oo ka tirsan Cisbitaalka Guud/Qaranka ee Carruurta.

Waxaan garwaaqsanahay in kororka ka yimid kala duwanaanshaha cusub uu dad badan ku keenayo xasillooni darro iyo cabsi. Fadlan ogow in aanu dhegaysanayno talada khubarada caafimaadka bulshada ee bulshadeena oo aanu raaci doono hagitaankooda si waafaqsan.

Markaan isu diyaarinayno inaan ku laabano fasalladeena todobaadka soo socda, Halkan waxaa ah qaar ka mid ah ilaha waxtarka leh iyo macluumaadka qoysaskeena iyo shaqaalaheena si ay u ogaadaan.

Cusboonaysiinta la cusboonaysiiyay go'doominta CAABUQA COVID-19-ban iyo Tilmaamaha karantiilka

Dugsiyada Magaalada Columbus waxay qaateen tilmaanta cusub ee CDC ee ku saabsan go'doominta CAABUQA COVID-19-ban iyo hababka karantiilka, iyadoo la raacayo talada Caafimaadka Dadweynaha Columbus. [\(Wax badan ka baro halkan hagida CDC ee la cusboonaysiiyay\) Learn more about the updated CDC guidance here.](#)

- **Haddii aad ka Baartay oo laga helay inuu qabo xaruunka/Togan ee CAABUQA COVID-19-ban**, iyadoon loo eegin heerka tallaalka, qof kastaa waa in go'doomiyaa 5 maalmood.
 - Haddii aadan lahayn/kaa muuqan astaamo ama calaamadahaagu ay soo fiicnaadaan 5 maalmood ka dib, waad ka bixi kartaa gurigaaga oo aad ku

laaban kartaa dugsiga / shaqada ilaa iyo inta aad ka sii wadanayso xidhashada fool-saab/maaskaro ee agagaarka kuwa kale 5 maalmood oo dheeraad ah.

○ Horraantiiba, CDC waxay ku talisay muddo karantiil ah oo ah 10 maalmood.

- **Haddii aad layeelayay xiriir dhow qof qaba CAABUQA COVID-19-ban,** xaaladaada tallaalka (oo ay ku jirto haddii aad qaadatay tallaalka xoojin ah) ayaa go'aamin doonta baahida loo qabo karantiil iyo baaritaan. ([Riix halkan si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ka timid CDC](#)) [Click here for additional details from the CDC.](#)

Wax kasta oo xiriir dhow la yeeshay xanuunka dugsiga dhexdiisa, waxaan sii wadeynaa raacitaanka Waaxda Caafimaadka Ohio ee hadda (ODH) Xirasho joog-taynta Fool-saabka/Maaskarada/Qaadashada Baaritaanka Tilmaamaha. Ardayda qaba caabuqa laakiin oo aal lahayn calaamadaha xanuunka ee gudaha dugsiga (asymptomatic) waxay sii wadan karaan inay ku sii jiraan fasalka iyaga oo xidhan fool-saab/maaskaro oona si dhow loola socdo calaamadaha.

Baaritaanka CAABUQA COVID

Haddii aad isku aragto ([calaamadaha CAABUQA COVID-19-ban](#)) [symptoms of COVID-19](#), waxaa si xoog leh lagugu dhiirigelinayaa inaad iska qaado/samayso baaritaanka CAABUQA COVID-19-ban. Iyada oo ay xirmooyinka baaritaanka guriga (at-home test kits) ay gabaabsi yihiin aaggayaga, waxaa jira bixiyeyaal maamula baaritaanada PCR. Hubi/Fiiri ([barta internetka ee Waaxda Caafimaadka Ohio](#)) [Ohio Department of Health website](#) si aad u hesho bixiyaha baaritaanka PCR.

CCS waxay haysaa oo usoo haray qalab aad u xaddidan oo loogu tala galay guriga dhexdiisa oo ah xirmooyinka baaritaanka COVID (at-home COVID test kits). Waxaan filaynaa inaan helno shixnad cusub oo xirmooyin ah todobaadka soo socda waxaana ku siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka xirmooyinka wakhtigaas.

Khadka Taleefoonka Warbixinta Heeganka CCS ee CAABUQA COVID

Haddii aad tahay shaqaale CCS ah ama waalidka arday laga helay cudurka qabidda baarita togan ama la xaqiijiyay soo-gaadhista bulshada, halkan waa sida loo soo wargaliyo qaadista xanuunka ama kiiska togan ee CCS:

- Ka wac Khadka Warbixinta Heeganka ee CAABUQA COVID-19-ban CCS ee 614-365-5544 oo fariin ugu dhaaf macluumaadka la codsaday; AMA
- Iimayl ugu dir natijadaada baarista xanuunka togan ee CAABUQA COVID-19-ban ee lasocodka Maamulka Degmada ee ah AdminContactTracing@columbus.k12.oh.us.

- Xidhiidhiyaha la socodka CCS ayaa soo celin doona taleefoonkaaga ama iimaylkaga si uu u bixiyo hagitaan dheeraad ah.
- Natiijooyinka baaritaanka xanuunka togan waa in had iyo jeer sidoo kale loo sheego bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga.

Talaallada

Difaacyada ugu wanaagsan ee aan kaga hor-tagno CAABUQA COVID-19-ban waa talaallada bad-qabka iyo waxtarka uleh ee sida guud loo heli karo. Waxaan ku dhiirigelinayaa qof kasta oo ka tirsan bulshadeena CCS inay is tallaalaan. Oo haddii horeba lagu tallaalay, hubso inaad wakhti siiso si aad u hesho tallaalka xoojintaada!

Liiska meelaha bixiya tallaalka CAABUQA COVID-19-ban ee da'da ilaa 5 sano iyo ka weyn, booqo [NationwideChildrens.org/Vaccine](https://www.nationwidechildrens.org/vaccine) ama [gettheshot.coronavirus.ohio.gov](https://www.gettheshot.coronavirus.ohio.gov).

Xusuusin ahaan, toddobaadka soo socda waxaan qaban doonnaa wareegga labaad ee rugahayada tallaalka heeganka ah ee CAABUQA COVID-19-ban ee ardayda u qalanta ee da'doodu u dhaxayso 5-ilaa 11 jir kuwaas oo helay kuuradoodii/irbadoodii ugu horreeyay bishii Disembar. Rugaha caafimaadka waxaa lagu qaban doonaa dugsiyada hoose iyo dhexe ee CCS inta lagu jiro saacadaha dugsiiga caadiga ah.

Xiro Fool-saab/Maaskaro

Waxaan sii wadeyana inaan uga baahanahay dhammaan ardayda, shaqaalaha, iyo booq-dayaasha inay ku xirtaan fool-saab/maaskaro gudaha dhammaan dhismayaasha CCS. Si loo helo waxtarka ugu weyn ee ka hortagga fayraska hawada, waxaa muhiim ah in had iyo jeer loo xidho fool-saab/maaskaro sida ugu habboon si ay u daboosho afkaaga iyo sankaa.

U diyaargarowga u Wareegista Waxbarashada meel ka baxsan dhismaha dugsiiga (Remote Learning)

Markaan aragno dugsiyada kale ee dadmooyinka deegaanka iyo guud ahaan gobolka oo u wareegaya waxbarashada ah meel ka baxsan dhismaha dugsiiga (Remote Learning) oo ay sabab u tahay shaqaale yaraan, waxaan ognahay inay suurto gal u tahay CCS. Haddii aan aragno yaraanta macalimiinta ama daboolida boosaska /beddelka fasallada ama yaraanta darawallada baska si ay si bad-qab leh ardayda ugu qaadaan, waxaan u beddeli doonnaa waxbarasho ku meel gaar ah meel ka baxsan dhismaha dugsiiga (Remote Learning) oo loogu talagalay dugsiyada ay dhibaataadu saameysey.

In kasta oo aan samayno dadaal kasta oo aan ku ogeysiinno shaqaalaha iyo qoysaska sida ugu dhakhsaha badan ee suurto gal ah, isbeddelladani waxay u dhici karaan si lama filaan ah. Waxaan ku dhiirigelinayaa dhammaan ardayda, macalimiinta, iyo shaqaalaha inay qalabkooda iyo tignooloojiyada u qaataan guriga habeen kasta. Ama, waxaan kugu

dhiirigelinayaa inaad qorshe u yeelatid sida aad ula qabsan lahayd waxbarashada meel ka baxsan dhismaha dugsiga (Remote Learning).

Waxa aan rajaynaynaa in aanay taasi ku imaan mid ka mid ah dugsiyadeena, laakiin waxaan qorshaynaynaa haddii ay dhacdo.

Warbixinta Maqnaanshaha Shaqaalaha

Diyaargarowgeenu wuxuu ku xiran yahay in aan si cad u fahanno heerarka shaqaaleysiinteena maalmaha dugsiga. Haddii aad tahay xubin shaqaale ah oo xanuun dareemaya, waxaan kugu dhiirigelinayaa inaad ogaysiiso kormeerahaaga ama aad u soo gudbiso codsigaaga maqnaanshaha sida ugu dhakhsaha badan. Marka ugu horeysa ee aan ogaano maqnaanshaha, si fiican ayaan u diyaarin karnaa oo aan ugu adeegi karnaa ardaydeena.

Waxaan rajeynayaa inaan si xooggan u bilaabo Sannadka Cusub oo aan arko ardaydeenna iyo shaqaalaheenna oo ku soo laabanaya fasallka Isniinta, 3-da Janaayo, 2022.

Si daacad ah,

Talisa Dixon

Kormeeraha/Maamulaha Guud, Dugsiyada Magaalada Columbus